



Qofka dadka hanuun ugu yeera wuxuu helayaa ajarka ay helayaan dadka hanuunka ku raacay mid la mida, iyagoon ajarkooda laga nusqaamin

Abii Hureyra-Allaha ka raali ahaadee- Rasuulka -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaate-wuxuu ka wariyey inuu yiri: "Qofka dadka hanuun ugu yeera wuxuu helayaa ajarka ay helayaan dadka hanuunka ku raacay mid la mida, iyagoon ajarkooda laga nusqaamin, qofkase ugu yeera dadka baadil wuxuu helayaa dambiga ay yeeshaan dadka ku raacay baadilka, iyadoo aan danbigoodii waxba laga nusqaamin."

[Xadiis Saxiix ah] [Waxa wariyay Muslim]

Nabigu -naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee wuxuu cadeeyey- in qofka dadka ku haga, tusa, oo ku booriya wanaaga iyo kheyarka hadal iyo ficil kuu doonaba ha ahaadee, inuu helayo ajar la mida ajarka dadka kheyarka ku raaca uu helayo, iyadoon waxba laga dhimayn ajarkooda Qofkase dadka ku haga ee tusa dariiqa baadilka iyo shar danbigi iyo gaf ku jiraan ama arin aan banaanayn, hadal iyo ficil kuu doonaba ha ahaadee, wuxuu helayaa dambiga ay yeelanayaan dadka xumaanta ku raacay, iyagoo aan laga nusqaamin dambiyadooda waxba.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/3373>

